# Hawlaha madadaalada/firaaqada

## Garoonka ciyaaraha/Jiimka

Waxaa jira fursado carruurta iyo dadka waaweyn ay ku ciyaaraan kubbadda cagta, kubbadda laliska, kubbadda koleyga, iwm. Saacadaha furitaanka ee hadda waxa laga heli karaa boodhka ogeysiiska ee ku hor yaala garoonka ciyaaraha iyo goobta jimicsiga.

## Adeegyada dadka waaweyn

Haddii aad xiisaynayso, fadlan sidoo kale waydii adeegyada loogu talagalay dadka waaweyn. Hoyga, waxaa jira qolal caadi ah oo kala duwan oo leh adeegyo kala duwan (qolka shaaha, koorsooyinka tolida dharka, qolka wax akhriska, iwm.).

## Hawlaha dhaqanka

Hawlaha ganacsiyada iyo waxqabadyada dhaqan-bulsheedka waxaa si joogto ah u bixiya shaqaale ka socda hay'ada shaqaalaha daryeelka arrimaha bulshada ee qaybaha kala duwan ah. Fadlan tixraac ogeysiisyada ku dhegan dhismayaasha.
Kuwani waxay noqon karaan, tusaale ahaan, safarro lagu tagayo agagaaraha ZASt (beerta xayawaanka ee loogu talagalay carruurta) ama munaasabadaha dhaqanka (Zora Halberstadt).

## Dukaan

Agagaarka xafiska weyn ee ZASt (dhinaca bartamaha magaalaha) waxaad ka heli doontaa fursado wax iibsi oo kala duwan (suuqyada waaweyn, dukaamada dharka). Goobahan waxaa lagu tagi karaa lug marka laga tago ZASt qiyaas ahaana waa 2 ilaa 3 kiiloomitir.

## Adeegga bulshada

Iyada oo loo marayo shaqada bulshada (tarjumaadda, gacan ka geysashada hawlaha garoonka ciyaaraha ama waxqabadyada kale, shaqada nadiifinta, dayactirka iyo waxyaabo kale) waxaad si firfircoon uga qayb qaadan kartaa naqshadeynta deegaankaaga isla markaana waxaad heli kartaa lacag yar. La hadal shaqaalaha arrimaha bulshada si aad uga faa'iidaysato fursadan.

## Tilmaamaha

ZASt Halberstadt waa oo ku yaala Friedrich-List-Straße 1a, dhanka koonfureed ee Halberstadt, jihada Klussiedlung. Masaafada u dhaxaysa boosteejada weyn ee tareenka iyo LAE Halberstadt qiyaas ahaan waa ilaa 5 km.
Boosteejada weyn ee tareenka markaad joogto waxaad ZASt ku tagi kartaa **tareen**: Khadka 2-aad, jihada Sargstedter Weg, ka bax "Herbingstraße" ama "Felsenkeller"
ama **Bas**: Khadka 12, jihada iyo ka bixitaanka "Klusberge".
Haddii aad ku socoto **lug**, raac tilmaamaha laga helo boosteejada weyn ee tareenka (tilmaam cad oo dhahaysa "Asyl").


## Daabac

**Daabacaha:** Auslandsgesellschaft Sachsen-Anhalt e. V.
anigoo ku hadlaya magaca guddoomiyaha isdhexgalka ee dowladda Sachsen-Anhalt, Susi Möbbeck

**Cinwaanka:** *eine*welt haus | Schellingstraße 3–4 | 39104 Magdeburg
**Websaydhka:** www.agsa.de

**Qoraalka iyo tafatirka:** Dr. Ernst Stöckmann
**Qof meel mas'uul ka ah sida ku salaysan xeerarka warbaahinta:** Krzysztof Blau, Agaasimaha Maamulka AGSA
**Design / Layout:** Matthias Ramme
**Bandhigyada / sawirada:** Ka Schmitz



Macluumaadka ku qoran buug-yarahaan waxaa ilaalinaya xuquuqda daabacaada. Dib u daabacida tuducyada qoraalka, sawirada ama muuqaalada ama in lagu isticmaalo sistemyada elektaroonigga ah ayaa macquul ah keliya marka la helo ogolaanshaha hore ee qoraalka ah ee daabacaha.



**Daabacaadda 2aad ee dib loo eegay lana balaariyay 2021**


**© Dhamaan Xuquuqda waa la ilaaliyey**


**Galintan (oo wata buug yar) waxa lagu daabacay 12 luqadood. Dhammaan noocyada kala duwan waxaa laga heli karaa khadka tooska ah ee Saxony-Anhalt: http://www.integriert-in-sachsen-anhalt.de/willkommen/erstinformationen-fuer-fluechtlinge/**

**Waxaad dalban kartaa buug-yarahan oo aad geli kartaa dhammaan luqadaha la heli karo halkan: integrationsportal@agsa.de**

AGSA
Auslandsgesellschaft Sachsen-Anhalt e.V.
Vielfalt engagiert gestalten – seit 1995

SACHSEN-ANHALT
Die Integrationsbeauftragte

WELTOFFEN WILLKOMMEN Sachsen-Anhalt

# Meesha ugu weyn ee lagala xiriiro ee loogu talagalay magangalyo doonka ee gobolka Sachsen-Anhalt



# Tallaabo tallaabo

**Imaanshaha iyo diiwaangelinta**
Kadib marka aad ka soo gaarto/timaado dhismaha xafiska weyn ee ZASt adigoo soo maraya waardiyaha iridda wayn, isku diwaangeli magangelyodoon ahaan sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah oo xaqiiji warbixintan (adigoo tagaya xafiiska diiwaangelinta, dhismaha A).
Haddii ZASt aysan mas'uul ka ahayn xarunta soo dhaweynta ee koowaad, waxaa laguugu meelayn doonaa xarun soo dhaweyn oo kugu habboon. Waxaad heli doontaa jadwal iyo tikit laguugu wareejinayo Deutsche Bahn. Goobta laga baxo: Boosteejada tareenka Halberstadt.

**Kaarka aqoonsiga iyo caddaynta imaatinka**
Kaarka aqoonsigaaga waxaa sidoo kale lagu bixin doonaa xafiiska diiwaangelinta. Aqoonsiga hoygu waa inaad had iyo jeer sidataa oo uu muujisaa marka aad imaanayso ama aad baxayso. Waxaa ku diiwaangashan macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga, booqashooyinka dhakhtarka iyo wax la mid ah. Waxaad sidoo kale halkaan heli doontaa caddaynta imaatinkaaga.

**Daryeelka bulshada**
Kadib, waxaad u tagi doontaa shaqaalaha arrimaha bulshada ee meesha mas'uulka ah. Halkan waxaad wax kaga qaban kartaa dhibaatooyinka oo aadna ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan joogitaankaaga dheeraadka ah ee xarunta. Waxa sidoo kale laguugu qoondeyn doonaa qol. Waxaad furaha ka heli kartaa dhismaha B/12 ama W/5. Waxaad ka heli doontaa isdiiwaangelinta elektaroonigga ah ee qaybinta cuntada ee maalmaha Isniinta ah oo aad ka heli doonto shaqaalaha arrimaha bulshada.
Fadlan fiiro gaar ah u yeelo ogeysiisyada hadda jira!

**Hubinta/Baaritaanka Caafimaadka**
Kadib, waxaad aadi doontaa xafiiska caafimaadka ee ku yaala dhismaha B/10, halkaas oo baaritaankaaga caafimaad ee ugu horeeya uu ka dhici doono. Baaritaankan sharci ahaan loo baahan yahay waa lagama maarmaan si meesha looga saaro wixii shaki ah oo la xiriira cudurrada faafa. Dhammaan tillaabooyinka dheeraadka ah ee ZASt waxay la xiriiraan tallaabadan.

**Xafiiska Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga (BAMF)**
Waxaad codsigaaga magangalya-doonimada u gudbinaysaa Xafiiska Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga (BAMF). Waxa aad martiqaad qoraal ah u heli doontaa arrintaan. BAMF-ka waxa uu ku yaalaa kasoo horjeedka xarunta soo dhawaynta ee hore.

**Xafiiska Daryeelka Bulshada**
Xafiiska daryeelka bulshadu waxa uu ku yaalaa kasoo horjeedka dhismaha A oo ku yaala albaabka weyn ee laga soo galo/xarunta waardiyaha ee ZASt. Halkan waxa aad u imaanaysaa inaad codsato ama aad ka soo qaadato gunnooyin si waafaqsan Xeerka Gunnooyinka Magangalyo-doonka (gunnooyinka kaashka ah iyo kuwa aan kaashka ahayn, ee loo yaqaan lacagta jeebka).

**Dharka**
Guri kasta waxaa ku yaal armaajo uu isticmaalo shakhsiga. Fadlan la xiriir shaqaalaha arrimaha bulshada si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

**Iska bedelida dharka iyo dhaqitaanka dharka**
Qolka dharka lagu dhaqdo (dhismaha B, C, W5) dharkaaga ayaad ku dhaqan kartaa. Waxaad sidoo kale heli kartaa alaabta nadiifinta si aad ugu isticmaasho gurigaaga. Halkan waxaad ku beddelan kartaa marada/gogosha sariirta wakhtiyo go'an.

**Daryeelka Caafimaadka**
Goobta saadka caafimaad ee MediCare waa meesha ugu horeysa ee aad la xiriirto haddii aad la kulanto xanuun/jirro degdeg ah. Haddii xanuunkaagu/jirradaadu aanu ahayn mid degdeg ah, waxaad u baahan doontaa shahaado daawayn oo aad ka soo qaadanayso xafiiska daryeelka bulshada kahor inta aanad dhakhtarka booqan.
Miyaad la kulantaa xasuusyo walaac leh, dareen taban, cabsi xoog leh, murugo, xanaaq ama fikrado isdil ah? Miyaad la kulantay xaalado naxdin leh oo aad hadda la ildaran tahay? Shaqaalaha daryeelka bulshada iyo MediCare waxay kuu gudbin karaan qaybta cilmi-nafsiga ee ZASt. Shaqaalaha qaybta cilmi-nafsiga waxay bixiyaan dood iyo jimicsi cilmi-nafsiyeed oo bilaw ah si ay kaaga caawiyaan xasilloonida.

**Ilaalinta**
Haddii aad aragto iska hor imaadyo rabshado/dad is dagaalaya ama haddii aad la kulanto cadaawad ama gacan qaad, la xiriir shaqaalaha arrimaha bulshada ama waardiyaha sida ugu dhakhsaha badan.
**Dugsiga barbaarinta carruurta/qolka ilaalinta carruurta**
Dugsiga xannaanada carruurta ee ZASt ee xafiiska weyn wuxuu ku yaalaa dhismaha C. Halkaa waxaad ka heli doontaa adeegyo badan oo kala duwan oo loogu talagalay carruurtaada da'doodu u dhaxayso 3 iyo 11 jir ee ku jira jawi ilaalin ah.

**Wareejinta**
U wareejinta degmooyinka miyiga iyo magaalooyinka madaxa banaan ee Sachsen-Anhalt waxay ka dhacdaa xafiiska wareejinta marka la gaaro taariikho cayiman. Fadlan sidoo kale la soco ogeysiisyada ku dhegan dhismayaasha kala duwan. Maalinta lagu wareejinayo, waa inaad soo celisaa gogosha sariirta, furayaasha iyo alaabta kale ee lagu siiyey waxaadna ku soo celisaa dhismaha B /12 ama W/5. Waxaad kaliya wareejin ku bixi kartaa marka kaarka aqoonsigaaga lagu shaabadeeyey ansaxnaansho.

# Daryeelka bulshada

Iyadoo ku xiran dhismaha lagu dejiyo, shaqaale xagga arrimaha bulshada ah ayaa mas'uul kaa noqonaya adiga. Waxay agaasimaan habraacyada, waxay bixiyaan boostada, kula buuxinayaan codsiyada waana dadka ugu muhiimsan ee aad kala xiriirayso ZAST. Isaga ama iyada ayaa ku siin doona dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan joogitaankaaga xarunta. Macluumaadkaas waxaa sidoo kale ka mid ah tilmaamaha (xeerarka guriga, xeerarka nadaafadda iyo xeerarka badbaadada dabka).

# Adeegyada laga bixiyo xarunta soo dhawaynta ee ZASt ee Halberstadt

## Xarumaha la-talinta ee loogu talagalay kala-talinta habraaca magangalyada iyo kala-talinta dib u noqoshada

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto joogitaankaaga hoyga hore ee soo dhawaynta, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa shaqaalaha jooga xarunta talada ee Caritas oo ku taala dhismaha C/1). Halkan waxaad sidoo kale ka heli kartaa talo ku saabsan dhammaan su'aalaha la xiriira sharciga ku aadan nidaamka magangalyada. Halkan waxaad sidoo kale iskugu diyaarin doontaa waraysigaaga.
**Fiiro gaar ah:** Fadlan la xiriir xarunta latalinta isla marka aad hesho warqad aadan fahmin. Si degdeg ah sidaas u sameey haddii aad hesho go'aan magangalyo oo taban. Caritas ayaa markaas kugula talin doonta xalalka sharciyeed ee suurtogalka ah iyo sidoo kale wixii talo ah oo ku saabsan dib u celinta.

## La-talinta nidaamka magangalyada ee Xafiiska Federaalka (BAMF)

Kahor intaan la gaarin wareysiga qaadayo BAMF, waxaad heli kartaa macluumaad, talo iyo taageero ku saabsan habraaca magangalyada F1. Kulamada la-talin kooxaha ama kulamo la-talin shaqsiyeed oo qarsoodi ah ayaa la heli karaa markii ballan la qabsado.

## Rückkehrzentrum Sachsen-Anhalt

Haddii ay waajib kugu tahay inaad dalka ka baxdo ama aad rabto inaad ku laabato dalkaagi hooyo, isla laabashada qofka ikhtiyaarkiisa u go'aansado ayaa ah xulashada dhibka yar isla markaana badbaadada leh marka loo barbardhigo dib u celinta qasabka ah. Wax badan ka ogow shaqaalaha arrimaha bulshada ee deegaankaaga. Gobolka Sachsen-Anhalt ayaa sidoo kale kuugu caawin doona dhaqaale kaa caawiya go'aankaaga dib u noqoshada ikhtiyaariga ah iyo in wadadaas ay kuu noqoto mid fudud.

## Koorasyada Jarmalka

**Baro Luuqadda Jarmalka!** Koorsooyin luuqadda Jarmalka ah ayaa lagu bixiyaa hoy kasta. Waxaa loo baahan yahay diiwaangelin, maadaama tirada dadka ay xadidan tahay. Fadlan la xiriir shaqaalaha arrimaha bulshada si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.